



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 11, 2021-ka

Ku socota: Hawl wadaagayaasha ODDS iyo Daryeel Bixiyayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Isbededalada Siyaasadaha Xaalada Degdega ah

Iyada oo ku saleysan jawaab celin laga helo hawl-wadaagayaasha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa isbeddelo ku sameeyay [siyaasadaha dhibaatada dhanka shaqaalaha ee degdega ah](#) ee la soo saaray Sibtambar 29, 2021.

Isbeddealda lagu sameeyay [siyaasadaha](#) waxaa ka mid ah:

- Kala caddeynta iyo ogeysiinta xooggan ee ku saabsan ku xadgudub la'aanta xuquuqda qof kastaa leeyahay inta lagu jiro dhibaatada
- Ka saarida awooda dadka qaba naafanimadu maskaxda iyo korriinku (I/DD) in ay si ku meel gaar ah ula joogaan xirfadlayaasha taageerada tooska ah ama shaqaalaha kale
- Tilmaamaha gelitaanka xogta la cusbooneysiiyay ee loogu talagalay hay'adaha maamulka kiiska (CME) marka dadku si ku meel gaar ah u guuraan

[Ilahan ka jawaabida xaaladda degdega](#) waa in la xaqiijiyo dadka hadda ku nool goobo la degan yahay ay sii wataan in ay sidaasi sameeyaan. Haddii qof ka tirsan adeegyadu oggol yahay in uu u wareego guri ruqsad haysta ama guri qoys oo kale oo loogu talagalay waqti gaaban, hadafkeenu waa in iyagu sida ugu dhakhsaha badan ugu soo noqdaan gurigoodii joogtada ahaa.

Waxaan sidoo kale sii wadnaa in aanu carabka ku adkeyno in kala doorashada siyaasadani ay noqoto xalka ugu dambeeya iyo xataa marka tallaabooyinkani degdega ah ee ku meel gaar ah la dhaqan geliyo, waa in ay jiraan dadaalo socdo oo ay wadaan CME iyo daryeel bixiyayaashu si loo xalliyo ama loo hagaajiyo xaalada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.